

MAABKA NADAMKA WAXBARASHADA VICTORIA



DUGSIYADA LUQADDA INGIIRISIGA (ESL) IYO XARUUMAHA
 Loogu talagalay ardayda dāda dugsiga oo uga soo guurey Victoria waddamada kala duwan. Waxay bixiyaan 6-12 bilood oo ah waxbarashada Luqadda Ingiriisiga Degdegga.

BARNAAMIJKA INGIIRISIGA SOO-GALOOTIGA DADKA WAAWEYN (AMEP)
 Waa daraasadda Luqadda Ingiriisiga ah oo loogu talagalay dadka dhallin-yarada ah oo ka weyn 18.

Dugsiga Hoose
 5-12 SANO JIRKA.
 Cid kastaa waa inay dhigataa oo dhammaynsaa 7 sannadood oo dugsiga hoose ah (Aaaska ilaa Sannadka 6aad).

Dugsiga Sare
 13-16 SANO JIRKA.
 Cid kastaa waa inay dhigataa oo dhammaynsaa ugu yaraan 4 heerar oo dugsiga sare ah (Sanooyinka 7aad-10aad).

Dugsiga Sare ee siniyarka
 16+ SANO JIRKA.
 Waa sanooyinka ugu dambeeya dugsiga sare Sannadka 11aad-12aad. Cid kasta waa inuu qaataa dugsiga sare oo waqti-buuxa ah ama waxbarasho ama tababar kale ilaa dāda 17aad. Dugsiyadu waxay bixiyaan khayaarada waxbarashada kala duwan ee ardayda kala duwan ah.

TAFE iyo RTOs
 Machadyada Taknikada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Hay'adaha Tababararka Diiwaangashan waxay qabtaan koorsooyinka Wabarashada Mihniga ama Tababararka (VET) kuwaas oo xoogga saara waayo-aragnimo camali ah ee diyaarinta shaqo-helidda. Machadyada TAFE waxaa leh dowladda halka RTOs ay yihiin koleejooyin gaar ah ama hay'adaha sanaacooyinka.

JAAMACADDA
 Waxay bixisaa daraasado kala heerar duwan iyo koorsooyin ballaaran, qaar kood waxay horseedaan shaqooyin gaar ah kuwa kalena waa koorsooyin guud.

VCAL (Shahaadada Victoria ee Waxbarashada La-dhaqangeliyey)
 2/3 sano shahaado WB ah waxaa ku jira waxbarasho farsamo oo la siiyo ardayda dhigata Sannadaha 11aad iyo 12aad. Waxay u diyaarisaa waxbarasho dheeraad ah, tababar, shaqo-ku-barasho ama shaqo-helid. Waxaa lagu dhammaynsan karaa dugsiga ama TAFE waxaana ka mid ah koorsooyinka VET.

VCE (Shahaadada Waxbarashada ee Victoria)
 2/3 sano shahaado WB ah oo la siiyo ardayda Sannadka 11aad iyo 12aad. Waxay u diyaarisaa waxbarasho dheeraad ah oo lagu qaato jaamacadda. Waxaa lagu dhammaynsan karaa dugsiga ama TAFE waxaana ka mid ah koorsooyinka VET.

Shahaadada I ilaa IV
 Waxay bixisaa horudhaca loo sameeyo aqoon iyo xirfado gaar ah. Koorsooyinku waxay u kala duwan yihiin xagga dherarka laga bilaabo lix bilood ilaa laba sano.

DIPLOMA/ DIPLOMA SARE
 Waxay siisaa shaqsiyaadka xirfado taknikaal ah iyo aqoon sare. Dibloomooyinka qaar kood waxay u baahan yihiin dhammaystirka Shahaadada 1v ee kooarsada la dfoonayo. Dibloomada: 2 sano WB ah ama 4 sano WDH ah Tan Sare: 3 sano WB ah ama 6 sano WDH ah.

DIGRIIGA BAJALOORKA
 3-4 sano WB ah ama 6-8 sano WDH ah
 Xoogga lagu saarayo hal maaddo.

FT = Waqti Buuxa
 PT = Waqti Dhimman

KHAYARADA WAXBARASHADA DHEERAADKA AH (ka dib dhammaynta Digriiga Bajaloorka)
 Shahaadada Garaajuweytka: - 6 bilood WB ah ama 1 sano WDH
 Diblomada Garaajuweytka: 1 sano WB ah ama 2 sano WDH ah.
 Digriiga Mastarka: 1 sano WB ah ama WDH u-dhima.
 Digriiga Dhochtarka: waa dhammaystirka digriiga Mastarka. 3 – 4 sano WB ah ama Waqti-dhimman in u dhigma.